

Yareynta Qashinka Iyada oo Dib Loo Isticmaalayo Alaabta

Waxa jira siyaabo badan oo loo yareeyo qashinka. Waxa fiican in aan marka hore la abuurin qashin, si loo waayo wax la tuuro.



Iibso kaliya waxa aad u baahan tahay. Haddii ay jiraan waxyaabo aad isticmaali doontid hal mar ama laba jeer kaliya, waad soo kireysan kartaa ama waxa aad ka soo amaahan kartaa saaxiibadaa. Waxa kale oo aad iibsan kartaa alaab la soo isticmaalay. Haddii aad iibsatid alaab la soo isticmaalay oo aad ka soo adeegatid iibka geerashka (garage sales) waxa aad dadka ka gargaaraysaa inay yareeyaan qashinka iyada oo aad adigu dib u isticmaalaysid.




Hab fiican oo dib loogu isticmaali karo alaabta aanad u sii baahnayn waa adiga oo siiya qof kale. Alaab guri, dhar, caruur-ciyaarsiisyo, iyo alaab kale oo nadiif ah oo dib loo isticmaali karo waxa loogu deeqi karaa kooxo aan faa'iido-doon ahayn oo badan. Dukaanada alaabta jaban sida Salvation Army iyo Disabled Veterans waxay xiitaa iman doonaan gurigaaga si ay u qaataan alaab deeq ah. Haddii aanad hubin in dukaanka alaabta jabani uu aqbali doono alaab gaar ah, wac oo weydii.



Waxa kale oo aad alaabtaa ku iibin kartaa iib geerash. Waxa aad u baahan doontaa inaad diyaar u noqotid iibka adiga oo habeynaya oo sicir iib u yeelaya alaabta, isla markaana ogeysiisyo ku dhajinaya xaafadda si aad dadka uga gargaartid inay yimaadaan goobtaada iibka. Dadka qaarkii lacag ayay bixiyaan si ay iibkooda ugu xayaysiiyaan wargeyska degmada. Lacagta laga helo iibka alaabta la isticmaalay waa mid markasta waxtar leh.



Dukaanada dilaalka ahi (consignment shops) waxay kaa qaadi doonaan alaabta xaaladdoodu aad u fiican tahay ka dibna kuu iibin doonaan. Alaabta waxay u habeeyan sida alaabta uu hayo dukaan alaab badan haya. Dukaanada dilaalka ah qaarkood waxay ku takhasuseen dharka iyo wiciyadda caruurta, dharka iyo alaabta kale ee haweenka, alaabta ciyaaraha, qalabka muusigga, jimicsiga, ama wiciyadda. Wac dukaanka oo weydi haddii ay aqbali doonaan alaabtaada.



Haddii aad haysatid alaab weyn oo aad doonaysid inaad bixisid waxa aad isticmaali kartaa Internetka si aad u xayaysiisid. Haddii aad ku nooshahay aagga magaalada barta www.twincitiesfreemarket.org ayaa kuu xayaysiin doonta alaabta aad isticmaashay. Adeegga FREEMarketSM waa adeeg liisgalin ah oo loogu talagalay deganeyaasha doonaya inay bixiyaan ama helaan alaab dib loo isticmaali karo oo bilaash ah oo ah guriga, geerashka iyo beerta. Qofka doonaya shayga waa inuu u yimaado si uu u qaato. Rugtani waxay gargaar ka geysataa yareynta qadarka alaabta la tuurayo iyada oo dib loo isticmaalayo.



Marka aynu yareyno ee aynu dib u isticmaalno alaab waxa aynu yareynaynaa qashinka aynu ku ridno dhulka qashin buuxiska ah, waxana aynu hawadeena iyo biyaheena ka dhigaynaa nadiif.



Wixii ah fikrado ku saabsan yareynta iyo dib-isticmaalka u tag barta www.GreenGuardian.com

